Maalgalinaha Sinnaanta ee Jihaysan

Wax ka qabashada sinnaan la'aanta caafimaadka heerka bulshada

Waxyaalo badan oo ka baxsan nidaamka caafimaadka ayaa saameeya caafimaadkeena, laga bilaabo hiddo-sidaheena iyo caadooyinka jimicisga ilaa guryeynta iyo helitaanka cuntooyin cusub. Nasiib darro, cunsurinimada hadda iyo horeba uga jirtay nidaamyadeena waxay ka dhigan tahay in dad badan ayna si caddaalad ah u helin khayraad muhiim ah kaasi oo caafimaadkooda wax ka tari lahaa—sida barxad cagaaran, fursadaha shaqada, iyo gaadiidka. Taasi waxay horseedi kartaa kala-tagsanaan natiijooyinka caafimaadka ee dadka iyo bulshada, waxaana la dhahaa sinnaan la'aanta caafimaadka.

2020-kii, Guddoomiye Brown wuxuu ku dhawaaqay yool ah in Oregon ay tirtirto sinnaan la'aanta caafimaadka Meesha lagu gaaro 2030. Si ay gacan uga gaystaan gaarista yoolkan, Sharci-dejinta Oregon waxay ansixiyeen House Bill 3353, kaasi oo u baahan CCOs inay:

- ku bixiyaan lacag badan barnaamijyada iyo adeegyada sare u qaadaya sinnaanta caafimaadka, *iyo*
- u noqdaan qaar u furan la-xisaabta dadka ay u adeegaan.

Ilaa iyo goortaas, Oregon waxay samaysay dhigaalo baaxad leh marka loo eego gobolada kale lyada oo loo marayo qaabkeena CCO.. Halkii dhigaaladani ay kaliya u faa'idayn lahaayeen miisaaniyadaha fadaraalka iyo gobolka, qorshahani wuxuu hubinaa maalgalinta bulshada qaabab sare u qaadaya sinnaanta caafimaadka.

Xeeladaha la soo jeediyey ee in dhigaalada lagu maalgaliyo bulshooyinka

Iskaashiyada Maalgalinta Bulshada

"Oo yaa kaga fiican inay sheegaan waxa looga baahan yahay bulshada ***aan ka aheyn bulshada?"***

-Ra'yiga bulshada ee Qorshaha Istaraatiijiyadeed ee OHA

Si ay wax uga qabato sinnaan la'aanta caafiamadka, Oregon waxay u baahan tahay inay bulshada siiso awood iyo khayraad. Hal siyaabo oo sidan loo sameeyo waa maalgalinta Iskaashiyada Maalgalinta Bulshada (CICs). Iskaashiyada Maalgalinta Bulshadu (CICs) waxay go'aamin doontaa dhibaatooyinkee ugu mudan in wax laga qabto iyo sida lacagta loogu bixin doono si loo yareeya sinnaan la'aanta caafimaadka. Tusaale ahaan, bulshooyinka qaar waxay dooran karaan inay diiradda saaraan isbaddalka cimilada, iyagoo hubinaya in xubnaha OHP ay heli karaan gabbaad heerkulkiisa la ilaaliyey marka kulaylka badan jiro, halka qaar kalena laga yaabo inay maalgaliyaan khayraadka qixitaanka ee dabka duurka ka kaca. Bulshooyinka kale waxay diiradda saari karaan horumarinta taageerada caafimaadka dhimirka ama bixinta daryeelka ilmaha oo raqiis ah.

Diirad-saaridda sinnaanta

Oregon waxay ka shaqaynaysaa inay tirtirto sinnaan la'aanta caafimaadka meesha lagu gaaro 2030. Si ay gacan uga gaysato gaarista yoolkan, CICs waxay diiradda saari doontaa dadka iyo bulshooyinka ay

waxyeelada ugu badan ka soo gaareen caddaalad darrooyinka hore iyo kuwa hadda taagan iyo sinnaan la'aanta caafimaadka, oo ay ka mid yihiin laakiin aan ku koobnayn:

- Qabiilada sagaalka ah Oregon ee fadaraalku aqoonsan yahay iyo bulshooyinka Qabiileed;
- Bulshooyinka Latino/a/x
- Bulshooyinka Madowga/Afrikaan Ameerikaanka ah
- Bulshooyinka Aasiyaanka ah
- Bulsho-waynta Dhaladka ah Jasiiradaha Baasifigga iyo Hindida Ameerikaanka ah/Alaska,
- bulshooyinka kale ee midibka;
- dadka qabo naafonimada;
- dadka Ingiriisiga aan sida fiican u aqoonin; iyo
- bulshooyinka soo-galootiga ah iyo qaxootiga

Sida Oregon ay u bixin doonto maalgalinaha Iskaashiga Maalgalinta Bulshada

Iskaashiyada Maalgalinta Bulshadu waxay yeelan doonaan laba meelood oo dakhli ka soo galo:

1. **Maalgalinaha gobolka-fadaraalka:** Lacagtani waxay toos uga iman doontaa gobolka si ay gacan uga gaysato bixinta lacagta mashaariicda CIC.
2. **Miisaaniyadda CCO:** Haddii dawladda fadaraalku oggolaansho siiso, ururada daryeelka abaabulan waxa looga baahan doonaa inay ku bixiyaan xaddi go'an oo miisaaniyaddooda ah taageerada CICs



Sida CICs ay u dhismaan, waxay sidoo kale u qalmi doonaan maalgelin loogu talagalay kharashaadka maamulka iyo hawlgalka socda, kaalmo farsamo oo jihaysan, iyo deeqo loo yaqaan "maalgalinaha sinnaanta caafimaadka" si sare loogu sii qaado sinnaanta caafimaadka ee bulshooyinkooda

Waxa tani ay uga dhigan tahay xubnaha OHP

Xubnaha OHP iyo xubnaha kale ee dadweynaha ee ka soo jeeda kooxaha ay sida daran u waxyeelleeyeen caddaalad-darrooyinka iyo cunsurinimada taariikhiga ah iyo kuwa haddeer jiraba ay la kulmi doonaan caafimaad tayo leh oo ka dhasha maalgelinada sinnaanta caafimaadka ee ay hoggaaminayso bulshada. Xubnaha OHP waxay arki doonaan kaqaybgalka bulshada ee go'aan-qaadashada ku saabsan maalgalinta khayraadka, taasi oo ujeedadeedu tahay quwaynta bulshada, horumar ku yimaadda caafimaadka iyo ugu dambeyntii baabi'inta sinnaan la'aanta caafimaadka. Sidoo kale, xubnaha OHP, ururada bulshada ku salaysan ee iyaga matala, waxay kaqaybqaadan doonaan nashqadaynta hannaan looga aasaasayo Iskaashiyada Maalgalinta Bulshada ee gobolka.

Waxaad ku heli kartaa dukumintigaan luuqado kale, daabacaad weyn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay. Kala xiriir Community Partner Outreach Program community.outreach@dhsoha.state.or.us ama adigoo wacaya 1-833-647-3678. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka hadalka dhibayo ama waxaad wici kartaa 711.